NOLOSHU WAA TUMA?

HORUDHACA BUUGGA

- ✓ Waxaa farxad wayn ii ah inaan kula wadaago buugan aad magaciisa halka sare ka dheehanayso ee magaciisu yahay noloshu waa tuma .
- ✓ Buugan wuxuu yahay mid ka warrami doona xaaladaha nololeed eey soo mareen dadkeenna soomalida ah
- ✓ Wuxuu ka warrami doonaa marxaladaha nololeed ee ay soo mareeen dadka reer guuraaga ahi isagaoo buugu ka warbixin doona dhacdooyin soo noqnon jiray iyo caadooyin ay lahaayeen dadka reer guuraaga ahi
- ✓ Dhinaca kale wuxuu buugu ka warrammi doona waqtiyadii magaaloyinku cusbaayeen ee ay samaysmeen magaaloyinku iyo wixi ay kala kulmeen dadkii reer guuraaga ahaa.
- ✓ Wuxuu buugu ka jawaabi doonaa suaalo dhowr ah oo ay kamid yihiin.

- *Dadka reerguura ahi side bay u noolaan jireen waqtiyadii hore?*
- *Muxuu ahaa hab dhaqanka dadka reerguuraagaahi intaysan magaalooyinka soo gelin?*
- *Maxay dadkii reerguuraga ahaa kala kulmeen magaaloyinka markii ay soo galeen?*
- *Magaalooyinka markay soo galeen dadkii reerguuraga ahaa maxay ka qabsadeen side se ayaa loola dhaqmay?*

✓ Buuggu maaha mid koobaya xaalad kasta iyo wax kasta oo ay dadkaasi ku sugnaayeen laakin wuxuu xooga saari doona wax kamid ah dhacdooyinkii dhici jiray waqtiyadii ay dadka soomaalidu u badnaayeen reerguuraaga.

✓ Buugu wuxuu soo koobi doona ama soo qaadan doonaa qaarkamid ah dhacdooyinkii iyo caadooyinkii reer guuraaga ee aan waqti xaadirkani jirin ee baa ba ay.

✓ Waxa kale uu buuga uu soo qaadan doonaa sheekooyin iyo dhacdooyin u eg musalsal{taxane} oo ah xaqiiqada dhabta ah reer guuraaga.

✓ Xaalad kasta iyo dhacdo kasta oo ku qoran buuganni maaha mid salka ku haysa dhammaan dhaqanka soomalida reer guuraaga ah.

ARAARTA QORAAGA

ABDIRHAEM SAED DUALEH ELMI {QABYAALAD-DIID}

- **Qoraaga buugani waa abdirahem saed,**

Xaaladaha nololeed iyo maraaxilka ay soo mareen dadkeennu waa mid u baahan in waxbadan laga daraaseeyo , anigu ma ihi mid waxwalba daraaseeyey balse waxaan doonayaa inaan wixii maskaxdayda ku jiray ee sida tooska ah u waajahay iyo maraaxiilka awoowayaasheen inooga sheekeeyen inaan kula wadaago.

Xaalad kasta oo buugan ku qoran ama sheeko kasta oo aan halkan kusoo bandhigo waxay noqonaysaa mid ka turjumta xaaladda nololeed ee aad adigu ku nooshahay ,

Waxaan ahay mid adiga toos kuula hadlaya ama toos kuu abbaaraya laakin ma ihi mid ku kooban kaliya xaaladayda.

Reerguuraanimo maaha wax loo dhasho ama se maaha wax la noqdo laakin waa xaalad ay dadku ku sugnaadaan muddo oo uu waqtigu ka dhigo reer guuraanimo.

Waxaad maqli kartaa odhaahyo odhanaya ” ninka hebel ama qoyska hebel beri hore reer magaal ayay ahaayeenoo haddeerna waa reer miyi tolow maxaa sababay?”

Sababta keliya ee aan odhan karno way tahay inuu hebel ama qoyska hebel miyiga u degay waxay noqonaysaa inuu noloshii markii hore ee u ku sugnaa uu waxba ka fahmi waayey ama inuu waayey noloshii reer magaalnimo.

Lakin buugan waxaan kuu eegayaa inaan marka hore kazoo bilaabo marxaladaha nololeed ee reer guuuraaga ee kaso turjumaya noloshada adage ee ay ku noolyihhin waxaanna ku xejindoonaa marxaladda nololeed ee ay kala kulmeen markii ay magaalada yimaadeen ama soo galeen.

Waxan ahay reer miyi markii danbena magalada soo galay oo ay ku dhacday qaarbadan oo kamid ah waxa ku dhacay qofkasto oo magaalo soo galay oo reer miyi ah.

Marxalada aan magaalada kala kulmay iyo marxaladda ay dadka reer guuraaga ah markay magaalada soo galaan kala kulmaan reer magaalku waa mid aan sahlanayn oo u eeg dagaal foolka fool ah.

Haddii aad miyi ku dhalatey oo aad magaaladda soo gashay markasta waxan rajaynayaa inaad la dareentahay kuwa aan sheegayo ,laakin haddii aanad weligaa magaalo mooyee miyi marxaladihiisa waxba ka arag waxaa kugu qasab ah inaad daraasayso si aad u ogaato waxani waxa ay yihiin.

Buugga magaciisa waxa uu yahay {noloshu waa tuma} oo waa suaal aan jawabteeda ku qornayn si toos ah buugga ,

Sababta ka danbaysa ayaa waxay tahay suaashaa jawaabteeda waxaan u arki waayey inay tahay mid aan ka jwaabi karo.

Marka nolol laga hadlayo isma waydiisid nolol laakin adigaagan akhrinaya buuga aan ku waydiiyee *[halkan ku naso oo is waydii micnaha nolol? Maxay tahay nolol? Waa tuma noloshu?]* jawaabtaas suaasheeda waxaan u daynayaa adiga iyo maskaxdaada ,haddii aad awood u leedahay inaad qeexdo ama aad ka jawaabto suaashan fadlan la wadaag asxbaataada oo u sheeg waxay tahay .

Codsi kalena aan kuu jeediyee bal suaashan jawaabteeda iigu soo dir baraha xidhiidh ee aan leeyahay waxaadna ka dhex heli kartaa buugan uun waa haddii aad awoodid.

Anigu wax jawaab ah uma hayo suaashan taasina waxaan kala micno ahay sababta jawaab loogu heli waayey dadkeenna reer miyiga ah ee tabaalaysan waqti walba xag waxbarasho xag caafimad iyo xag nololeedba waana sababta aan suaasha kuu waydiiyey.

Guntii iyo gabo gabadii guusha aad haysato ama guuldarrada kusoo waajahday waxay ku xidhantahay hab dhaqanka aad la leedahay dadka aaggaaga ah.

MAHADSANID

Waqtiga aan bilaabay buugan:

08/23/2016

Waxaa qoray:ABDIARHEM SAED DUALEH

I. MARXALLAD 1.AAD

Waxuu jawiga cirku u ekaa inuu yahay mid galabta soo da aya oo roob inbadan la sugayey inuu iman doono rajo badan laga qabo

Gurigu maaha mid u dhisan imuu yahay mid adag ama mid iska xejin kara laba xaaladood oo ah roobka iyo dabaysha xagaagaba , dhexda waxaa ka taagan laba kabaal oo qabta buulka yar marka uu soo dao roobku ama marka ay soo dhacdo dabaysha xagaaga.

Meesha uu ku yaalla waa wintiir aan lahayn geed la cuksado waana meelaha ay kusoo hiranayso dabayshu marka ay dhacayso ama marka weedhka roobka xoogani soo da ayo ;

Ma aha aqalku mid u adkaysan sida reeraha kale ee deriska oo qaarkood isku qoofalanyahay aqalkoodu , ma saarna guriga wax shiraac ah mana awoodaan inay soo gattaan wax uunka celiya daroorta roobka ,
Marka ay soo da do dhibicda roob guriga doc walba oo kamid ahi way daroortaan dhinacyadana weedhka iyo daadka roobka ayaa kasoo gala oo markii horeba ay sii faydfayday dabayshii kasii horreysay roobka ama ufadii roobka hor socotey.

Aqalka waxaa dhexyaalla uun laba jirkaan oo caag ah kuwa biyaha lagu dhaansado waxaa kale oo dhexyaalla laba bacood oo ay ku jiraan waxoogaa ah calalkii dhar ahaa ciyaalka iyo dhowr shay oo odayga iyo islaantu leeyihin

Dhaxanta iyo qayyoodka roobkuna waa mid ka helay meel cidlo ah oo aanay wax difaac ah oo go` u waynyahay aysan haysanin , laba caw ah oo mid ciyaalka loo goglo midna odayga reerku iska leeyahay ayaa intaas u wehelisa

Waqtiguna waa abbaaro ay waxaro xidhxidhii sii liiqayso geeliina uu wiilkii raacay markaa soo mirato laastay roobkii la saadaalinayeyna uu qarka u saarnyahay inuu eebbe amro inuu soo gaadho reerkan.

Kaasi waa tilmaanta guriga aabbo HAYAAN iyo hooyo XAAWA waa waalidka dhalay 9 caruur ah ay 4hablo yihiin waa marxaladda ay ku suganyhiin marka ay dhexjoogaan gurigooda waana sifada dhabta ah ee taalla qoyska hayaan iyo xaawa .

Hayaan iyo xaawa waxay isla soo mareen marxalado nololeed oo waayihiisa leh waxay soo waajeheen dhib iyo dheef mudadii ay wada noolaayeen laakin manta waxa ay haystaan 9 caruur ah oo dhowr ciidanyihiin kana adagyihiin daaqa xoolaha iyo aroorintooda hase ahaatee aan gaadhin wali inay xadhiga waddaanka intay qaataan la tagaan darka ceelka oo weli hayaan ayaa shaqadaas haya.

Caawa oo roob soo da ayo laakin wer werka kaliya ee ay qabaan waa sidii ay u samata bixin lahaayeen uun adhiga inta xayeeshka ah iyo caruurta oo dhaxanta aan u adkaysanayn sababtoo ah roob ayaa ah kan la saadaalinayo.

Iminka waxay ku dhowdahay waqti ay xidigihii lo`du sii hoobanayaan roobkiina uu qarka uu saaranyahay inuu qabsado dabayl iyo ufo aad u xoogbadan ayaa roobka kasoo horreeya waxaana laga cabsi qabaaba inay ufada iyo dabaysha wada socdaa buulka yar ka takhallusaanba waana cabsida labaad ee wajhaysa reer hayaan.

Waqti yar kahor intaanay qabsan dhibicda roob hayaan waxaa la illaaway in lasoo dabdabro halihii yaraa ee wiilku soo miray oo in muddo ah aan waraab gelin intii la isku lahaa waar kac hebelow geela soo xidhxidh iyo jawaab ah waayahy ayaa waxaa weerarkiisi habeenimo ahaa soo qaaday xaywaankii waraabe ahaa ,wan 2jir ah oo reerkuba isku hallaynayey oo quruxdiisa aysan quudheen ayuu la boodey,

Qaylada iyo sawaxanka ka yeeraya reer hayaan waa mid ay maqlayaan degmada la taal aagga laakin dheg looma jalaqsiino waxaa lagu dhaafay “waar ninkii hayaan waraabe ayaa caawa soo weerarey uun”

Odaygii hayaan ahaa cagaha ayuu wax ka dayey si uu bal in uun isugu dayo inuu waraabaha kasoo dhiciyo neefka , wuxuu daba carorab hayaan nasiib uma yeelan inuu kasoo rido wanka waraabaha.

Intii ay hayaan iyo waraabe is eryanayeen waxaa soo curatay raxmaddii eebbe oo durtaba ku bilaabantay baro waaweyn oo dhulkii isla waqti yar ku cadcaddaysay ayuu hayaan dib usoo laabashadiisii isagoo faro madhan kusoo baxay halihii geel ahaa oo illeen in muddo ahba aan lasoo waraabin oo oomman oo jeexa mid waliba halkii ay caddaan yar oo biyo ah ku aragto u cararayso.

Qabowgu daranaa ,dhulkuna madoobaa waaba 13naad gudcur ah oo aad arki kartid uun inta aad ku taagntahay ku darso oo weliba roob ayaa hooraya weliba weedh wata, mararka uu hillaac ka galalacsiiyo roobku ayuunbuu arki karaa tulud sii socota ama mid foorarta oo biyo uun urinaysa ,

Xaaladkasta oo cabsi leh way ku xeerantahay iminka hayaan oo gurgiina in door ah ayuu jiraa , walaaca koowaad ee uu wajahayaa hayaan wuxuu yahay isagoo xasuusan in waraabe oo ah cadaw uu ficil kala dhexeeyo dadka degmada uu muddo yar oo aan dheeraynba kala sii maqanyahay neef kii ugu sitay xoolihiisa .

Iska soo luud oo kusoo dhac dhowr tuldood oo jeexa u biyo raadsaday dabada ayuu kasoo maray illeen waa nin faramadhane miyuu geelani waxba iskaga tirinayaa , kelmado uun canaan ku ah halaha ayuu isticmaalayaa si uu ula tago golihiisii oo u dabro halaha intii gudaysa.

Markuu golihii geela keenay dhowrkii uu waday ayuu horta ku hubsday dabarka intii xadhig yaqaanka ahayd , saa xaggan ayuu eegay mise halba golaha laguma oga illeen waa geel oommane miyuu joogayaa , xagan iyo xagan ayuu himbiriirsaday illeen ciil uma dhimatid, wax uu sameyo ayuu garan waayey o xaalka uu ku suganayahy isaga uunbaa dareemi kara roobkiina waa sii xoogaystay oo mahiigaan ayuuba isu rogay, dhaxanta daran, madowga gudcurka ah iyo ninkii waraabe ahaa ba waa xaaladaha ku gedaamin oday hayaan.

Iminka xalkale mahayo aan ahayn inuu doono halaha inta maqan laakinse intan maqan haduu doono waxaa iyana u baahan in la hortaagnaado intii uu keenay intuu xidhxidhay maahee intii aan xarig baradka ahyn.

Markan xalka kaliya ee uu haystaa waa inuu u yeedho wiilkii geela ee AXMED ahaa oo isagu marhore u cararey buulkii hooyadii si uu uga galo dhibicda robka ee aan adkaysiga lahayn,

“Axmedoow” ayuu ku qayliyey , waxaa maqashay islaantii xaawa ahayd oo caawaba la baxaa degaysay ciyaalkii intii yaryarayd oo lulootay biyona ay usoo buuxiyeen aqalkii “HEE waar hayaanow wankii masoo riday “ ayay jawaab uga dhigtay , “naa mayee maxaad geela yaacay ee jeexa galay usoo celinwaydeen intaan guri isku aabudhaysaan “ ayuu jawaab uga dhigay oo u eg hadal canaan ku dheehantahay.

Hayaan odaygii ahaa iminka talo ayaa ku cad wax walbana waxay u eegyihiin kuwo murugsan oo aan sifo loo yeelo lahayn , bal haddaad qiyaasto xaalad mugdi ah oo roob cidlo bilaa gabbaati ah kaa helay reerkana kaaligaa aad ciidan u tahay reerka xaalkuna afar jiho eeg yahay , waraabena imtixaan lagaaga dhigay bal maxaad samayn lahayd.

Hayaan iyo xaalkiisa waxaa qiyaasi kara nafsadiisa iyo intii la dareenka ah habeenkaas.

Ma geela inta tagtay ayaad doontaa , ma inta joogta ayaad ilaalisaa , ma adhiga ayaad waraabaha ka eegtaa , xaalkiisu waa mid uu u yahay khasbane {micnaha mid xaaladu qasbayso dhinac kasta}

Wuxuu meeraysto in xoogee ahba wuxuu go aansday inuu soo kiciyo wiilkiisii ahmed ahaa si uu inna uun uga caawiyo xaaladan cakiran,
Roobku weli waa mid isku soo duba dhacay wuxuuna haatan marayaa xaal la odhan karo waa mahiigaan waxaana intaas u dheer wuxuu roobku leeyahay weedh.
Axmed buu ugu yeeray cod qaylo dheer ah mar labaad , wuu soo baxay axmed yare wuxuu u yimi aabihii hayaan ahaa oo dhex taagan golihii geela , wuxuu hayaan wiilkiisii ku yiri “aabe waxaan doonayaa geela u mirato tegay jeexa e bal intan lasii joog oo sii ilaali “

“haye” ayuu axmed ugu jawaab adigoon qiyaasi Karin xaalka qadh-qadhyada iyo dhaxanta haysata axmed oo isagu kaba sii nugul sida uu yahay aabihis oo waaba wiil yara axmed , ilkaha ayuu isku garaacayaa wuxuuna sitaa go` yar oo jeexjeexan oo uu roobku mar horeba qooyey ,

Hayaan geeli mir tegay ayuu doonay wuxuu himbiriirsadoba wax soo kexee waxna ka yimi **“waar geela isku tiri”** ayuu ku yiri axmed markii uu golaha keenay geeli,

Axmed wuxuu marba indhaha ka seexdoba haddana waxuunbuu sii kala garanayaa inkastoo xaalka oo adkaa uu dawakhiyey axmed yare **“hashii igadhka ahayd iyo laba qaalin oo ay midkood yahay ina degan ayaa maqan aabe”** ayuu ugu jawaabay axmed aabihis hayaan.

“kuwaas uma malaynayo in waxkasii noolyihiin ayaan filayaa oo waraabe ka toshaye bal aan meelahaas kasoo himbiriirsado eintan sii hortaagnow” ayuu hayaan wiilkii faray ,

Xagaas ayuu uga luuday iyadoo jeexa biyo qulqulayaan roobkuna biyihiisu is gaadheen.

Ileen habeen dhib kuuma ogee kii yaraa ee uu kaga tagay geela intii golaha joogteyna lulo iyo ayaa kaa itaal roonaatey oo hal ayuu iska tiirsaday siuu inna uun uga badbaado qadhqadhyada roobka wuuna gam`ay ,
Intii uu yarku yara lulooday ayay show kaba hoos dustay intii hadhsanaydna oo iska dareertay intii xidhxidhnayd maahee.
Goor danbe ayuu axmed yare baraarugay iyadoo dhowr neef xerada taaganyhiin intii kalena ka socotey,

Mar uu xaalku sidaas yahay arrinkuna yahay mid cakiran ayuu odaygii hayaan ahaa soo laabtay isagoo faramadhan oo aan gacanta waxba ku haynin, golihii ayuu yimi iyo wiilkii yaraa oo dhex taagan wax bandanna aanay kasii joodin

geelii, waqtigu waa saq-badh ay jaantu joogsatay roobkiina biyo maasheeyey laakin awoodiisii ay yartahay iminka oo uu siu bedelay gafacle,

“axmedow mee geela inti aan kaaga tegay ma wada dhamma e “ ayuu ku yiri hayaan wiilkiisiii,
“ ma garanayo aabe , wuu iska mirato tegay illeen geelu masoo cabin indhowyde wuxuu raadsanayaa biyo e”

Xoogee canaan ah way dhex martey axmed yare iyo aabihiis ,hayaan wuxuu u kicitimay markuu soo jahawareeray xagaas iyo gurigii ay yaryarku joogeen bal si uu war uun uga helo sida uu ka yeelay roobkii,
gurigii ayuu tegay wuxuuna u tegay ciyaalkii oo ay islaanti waxoogaa jirkaaamo ah oo ay haysay iyo in ood ah oo ay adhiga kasoo gurtay isu dulsaartey oo labadii cawood ee guriga yaalleyna u dulsaartey si aanany daadku ugu soo gelin halkaasna ayay ku gam`een , islaantii hooyadood ahaydna way taagantahay oo daalka iyo qadhqadhyadu waa mid aanay cidna uga ashkatoonayn.

Hayaan hadalba ma waydaarsan islaanta e wuxuu haddana jalleecay xagii xerada adhiga wuxuu arkay adhigii oo dhaxan laysay qaarkoodna isku kogeen illeen adhigu maahayn mid doog daaqay in muddo ah wuxuuna u ekaa adhigu mid isku jir ah oo qaarna ay saamaysay jilaalkan laga soo doogayo qaarna wuxuu ahaa mid u adkaystay xaaladdahaas lasoo maray,